

Somali | Soomaali

27-ka Maarso 2025

Warbixin muhiim ah oo ku saabsan raritaanka la rarayo xafiiska guryaha ee North Melbourne

Waxaan rabnaa inaan kula socodsiino wixii kusoo kordha marxalad kasta oo dib u dhiska ah.

Warqadaan waxaa qeyb ka ah macluumaad ku saabsan:

- U diyaargaroowga rarista xafiiska guryaha ee North Melbourne
- In aan kula socodsiino wixii soo kordha marba marka kasii dambeysa oo ay qorshaha wax kusoo ziyaadaan

Xafiiska guryaha ee North Melbourne waxaa loo rari doonaa Ascot Vale bisha Sebtembar ee 2025

Iyada oo qayb ka ah dib u dhiska 33 Alfred Street, kooxda guryeynta ee North Melbourne waxay dhamaadka Sebtembar 2025 u guuri doonaan xafiiska guryeynta ee Ascot Vale ee ku yaala 12 Churchill Avenue, Ascot Vale.

Kooxda North Melbourne waxay sii wadi doonaan inay daryeelaan isla markaasna taageeraan kiraystayaasha, mana jiri doono isbeddel ku yimaada kooxda North Melbourne taas oo qayb ka ah guuritaanka.

Waxaan ognahay in kooxda North Melbourne ay qabtaan shaqo aad u fiican oo ay kireystayaasha runtii abaal uga hayaan, taasina way sii socon doontaa.

Waxaad awood u yeelan doontaa inaad ku hesho caawimo iyo taageero si la mid ah sida aad hadaba u hesho, oo ay ku jiraan ballamaha fool-ka-fool ah iyo booqashooyinka guriga, qaab taleefanka iyo iimaylkaba ah.

Weli waxaad awoodi doontaa inaad wacdo kooxda aad hadda wacdo.

Maxaynu u dooranay Ascot Vale?

Waxaan sahaminay xulashooyin badan waxaana Ascot Vale loo doortay sababahan:

Goobta oo dhow: Xafiiska guryeynta ee Ascot Vale wuxuu saddex kiiloomitir oo keliya u jiraa North Melbourne. Sidoo kale waa xafiiska ay kooxda guriyeynta Flemington ku shaqeeyaan.

 Iskaan
garee si aad
u hesho
macluumaad
la fasiray oo
luuqadaada
ku qoran




U wareegista oo sahlan Xafiiska guryeynta ee Ascot Vale waxaa mar hore loo diyaariyay xafiis ahaan, taasi waxay ka dhigan tahay inaan sii wadi doono howlihii aan u heynay kireysteyaasha markaan guurno - taasoo u fiican kireystayaasha iyo shaqaalaha labadaba.

Inta uu qaadi karo: Xafiiska guryeynta ee Ascot Vale waxa uu leeyahay dhul ku filan oo wada qaadi kara kooxda North Melbourne.

Badbaadada iyo u hoggaansanaanta: Waxaan u baahanahay inaan hubinno in xafiisku uu badbaado u yahay bulshada iyo shaqaalahayaga. Xafiiska guryeynta ee Ascot Vale wuxuu mar horeba buuxiyay shuruudaha badbaadada, amniga, wuxuuna sameeyay tas-hiilaadka sida qolalka shirarka ee gaarka ah, tignoolajiyada, musqulaha iyo jikada shaqaalaha.

Xagee ayuu ku yaal xafiiska guryaha ee Ascot Vale?

12 Churchill Avenue, Ascot Vale



In aan kula socodsiino wixii soo kordha marba marka kasii dambeysa oo ay qorshaha wax kusoo ziyaadaan

Waxaan isku diyaarineynaa inaan kooxda North Melbourne u rarno xafiiska guryaha ee Ascot Vale dhamaadka Sebtembar 2025. Waanu kula socodsiin doonaa wixii soo kordha marba marka kasii dambeysa ee uu qorshuhu isbedelo waxaana sidoo kale xaqiijin doonaa inaad helayso daryeelka iyo taageerada aad u baahan tahay.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan waxa ka socda North Melbourne, booqo: <https://www.homes.vic.gov.au/precincts/north-melbourne-precinct>

www.homes.vic.gov.au



@homesvic

